

# Takoorka Waxbarashada

---

## **Takoorka waxbarashadu sharci daro ayuu ka yahay Menesota**

Marka loo eego Qodobka Xuquuqul Iinsaanka Menesota, waxbarashadu waxa ka mid tahay “meelaha la ilaaliyo” waana sharci daro in si gooniya loola dhaqmo waxbarashada dadwaynaha, ta gaarka ah, iskuulada farsamada, jaamacadaha iyo kuliyadaha in loo eego:

- Jinsiyad
- Midab
- Mabda
- Diin
- Halka aad jinsiyad ahaan ka timid
- Lab ama dhidig
- Da (Hadii aad tahay 25 jir ama aad ka wayn tahay)
- Inaad reer leedahay iyo in kale
- La’xaad la’aan
- Taakulaynta Dadwaynaha
- Nooca aad tahay lab iyo dhidig ama wixii u dhaxeeya

Waxa kuwani loo yaqaan “noocyada la ilaaliyo” waxa jira kuwo laga reebo sida nooc kasta loo daboolayomarka loo eego Qodobka Xuquuqul Iinsaanka Menesota. Si aad wax uga sii baratid waxyaabaha la ilaaliyo iyo nooca dadka la ilaaliyo, akhriso *Xuquuqdaada*.

## **Tusaale yaal la odhan karo waxay yihiin takoor waxbarasho**

Cadaalad darada ku salaysan waxbarashadu aad bay u dhacdaa. Laakiin fal cadaalad daro kasta ahi ma aha sharci daro. Waa kuwani tusaale yaal noqon kara takoorka waxbarashada sharci daro:

- Kuliyadi ma ogolaanayso inay qaado arjiyada ka yimaada dadka da’doodu ka wayn tahay 50 sano.
- Macalinka oo dadka aan ku hadal Af-Ingiriisiga si cadaalada ula dhaqmin waayo isagu/iyadu wuxuu umalaynayaa inaanay ardaydani waxba baran karayn, waana inaanay ku jirin iskuulka si kastaba ha ahaatee.
- Arday Aasiyaana marka iskuulka aad loogu dhibo jinsiyadiisa awgeed. Ardayga oo u sheega isaga/iyada macalkiisa iyo maamulaha iskuulka waxa dhacaya. Iskuulka oo aan waxba ka qaban dhibaataadaasi inkastoy dhacdo wiig walba.
- Kuliyada oo qaabisha arjiyo ka yar inay iskuulka soo galaan dadka jinsiyadaha kale ah marka loo eego intay dadka cadaanka ah ka qaabilayaan. Kuliyada oo doonaysa inay ardayda badidoodu cadaan noqdaan.

## Maxaan ka qaban

Hadii aad u malaynaysid inaad tahay dhibane takoor:

- Qor wixii kugu dhacay hadii aad u malaynaysid inay cadaalad daro ahayd.
- Qor taariikhihii ay cadaalad daradaasi dhacday.
- Qor magacyada dadkii kale ee joogay.
- Qor wixii dadkii halkaasi joogay yidhaahdeen.

## Ha baajin!

Mar marka qaarkood way adag tahay inaad garatid wixii takooro iyo wixii aan takoor ahayn – marxalad kastaaba waa gaar. Laakiin hadii aad u malaynaysid inaad tahay dhibane takoor, ha baajin.

Si deg deg aula soo xidhiidh Laanta Xuquuqul lisaanka Menesota. Waxaad haysataa sanad inaad dacwada ku xaraysid laga bilaabo kadib markii uu takoor ku dhacay.

**Waxaan telefoonka ka jawaabnaa Isniinta – Jimcaha, 8:00 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo**

### Telefoon

651-539-1100

TTY: 651-296-1283 (Dadka maqalku ku adag yahay)

Khadka bilaashka ah: 1-800-657-3704

### Sidii loo heli lahaa turjumaan

Hadii aad u baahan tahay turjumaan si aad ula hadashid xafiiskayaga, waxaanu ku siin doonaa mid bilaasha. Waxaanu leenahay shaqaale naga tirsan oo ku hadla Af-Isbaanish iyo Af-Hamang.

Nala soo hadal adiga oo odhanaya, “I need a Somali interpreter.”

### Uma baahnid balan inaad xafiiskayaga ka dhigatid si aad u soo booqatid

Waxaanu qaabilnaa dadka lugta ku yimaada 9:00 subaxnimo ilaa 4:00 galabnimo, Isniin - Jimce.

### Ciwaankayaga

Minnesota Department of Human Rights

Freeman Building

625 Robert Street North

Saint Paul, MN 55155



## Email address

info.MDHR@state.mn.us

*If you are emailing the department about filing a charge of discrimination and do not receive a reply within five business days, please contact our intake unit by phone at 651-539-1100 (TTY 651-296-1283) or Toll Free at 1-800-657-3704.*

***Qoraalkani jawaab dhamaystiran uma'aha takoorka waxbarashada marka loo eego Qodobka Xuquuqul Iisaanka Menesota.***

*The Minnesota Department of Human Rights wishes to acknowledge Precision Language Services' generous contribution of time and language translation expertise on this document.*